

Sida Loo Nadiifiyo, Bahda Doonliga Kaddib

Taxadirka firuska "hantavirus"!

Doonliga nooca "deer mice" wuxuu kaadida raacin karaa firuska "hantavirus" kaasoo dhimasho u keeni kara dadka. Waxaad dhismooyinka, daashashka, ama guryaha xeran u furta hawada muddo 30 daqiiqo ka hor inta aadan nadiifin.

1. Gasho gacan gashadka "latex" ama goomaha iyo wiji-daboolka boorka inta aad ka nadiifineysid.
2. Waxaad isku qastaa milanka 1 koob oo caddeeye ah iyo 10 koob oo biyo ah ama isticmaal cayayaan dishada guriga.
3. Ha marinin faakum, ha xaaqin, ama ha ka qaadin boorka meelaha qalalsan marka aad nadiifineysid. Tan waxay faragelisaa kaadida iyo xaarka qalalay ee doonliga lagana yaabo in ay ku jiraan bakteria ama firus waxyeelo keena.
4. Dhamaan meelaha wasakhaysan, doonliga dhintay, waxyaabaha ku daata iyo meelaha hooyga u ah, waxaad ku nadiifisaa cayayaan dishada ka hor inta aadan nadiifin. U dhaaf cayayaan dishada in ay shaqeyso ilaa 10 daqiiqo.
5. Buufi miisaska korkooda, qaanadaha, jiiidiyada, kabbisyada iyo boorarka.
6. Uumi ku nadiifi katiifadaha, rogagga, iyo fadhiga.
7. Iska tuur doonliga dhintay iyo waxyaabaha wasakhaysan adiga oo dhexe geliya labo bac kaddibna ku tuura qasaca qashinka ee yaala dibadda.
8. Waxaad dharka iyo furaashka sariirta ku dhaqdaa detergente iyo byo kulul. Kor u kici qalajiyaha.
9. Marka aad dhameysid, buufi cayayaanka ama iska tuur gacan gashadka aad isticmaashay. Dhaq gacmahaada ama ku qabeyso saabuun iyo biyo kulul.

Samaynta iyo Isticmaalka Milanka Lagu Dilo Cayayaanka




Isku qas milan ka kooban 1 koob caddeeye iyo 10 koob biyo.

Si wanaagsan u mari meesha wasakhaysan kaddibna sug inta ay diyaar ka noqoneyso muddo 10 daqiiqo ka hor inta aan la nadiifin.

Qaado Mas'uuliyadda Ahaaw Deris Wanaagsan

Waxaad kaalmo ka geysan kartaa ka-hortagga dhibatooyinka bahda doonliga deriskaada. Dagmada King County, milkiileyaasha hantida ayaa mas'uul ka ah in ay ka hortagaan xaaladaha ka jira hantidooda ee hooy iyo raashin siya doonliga waaweyn. Waxaad tan ku sameyn kartaa marka aad hantidaada u dayactirtid si aan soo jiidanin bahda doonliga. Kaddib marka ilaha raashinka iyo goobaha hooyga u ah meesha laga saaro iyo doonligana la laayo, waa in la dayactiro hantidaada si doonliga uusan u soo noqonin.



ILAHA

Waxaad dhibatooyinka doonliga u sheegtaa Caafmaadka Dadweynaha Wac 206-263-9566 ama internetka www.kingcounty.gov/rats

Sharciyada u dagan bahda doonliga King County Qeybta 8aad Ka Hortagga Cudurka www.kingcounty.gov/boh

Macluumaadka ku saabsan cudurada laga qaado doonliga www.kingcounty.gov/pocket-pets

Public Health

Seattle & King County

Public Health—Seattle & King County
Environmental Health Services
Rodent Prevention Program
401 5th Ave. Suite 1100
Seattle, WA 98104
206-263-9566

Waxaa Lagu Heli Karaa Qaabab Kale

October 2018

DOONLIGA WAAWEYN

LAMA RABO



Afar Talaabo oo looga Hortaggo
laguna Kantaroolo Faafidda Bahda
Dooliga

Tilmaanta ku Socota Milkiileyaasha
Guriga iyo Kireysteyaasha


Xaqiiqada Doonliga

Doonliga waxay cunaan wax kasta!

Doonliga wey koraan, wey boodboodaan iyo waa dabaashaan. Haddii unreyska koro - doonliga waa kori karyaa.

Doonliga wuxuu calaajiyaa blaastigga, looxa, biraha jilicsan, fiilooyinka korantada (taasoo mar mar sababta dab) iyo xataa blokeeti iyo dhagax.

Doonliga wuxuu isku cariiriyaa meelo aad u yar, hooy mugdi ah oo kulul, wuxuu dhali karaa ilmo badan muddo 3 ilaa 4 todobaad.



Cabbirka dhabta ah godka uu doonliga geli karo



Cabbirka dhabta ah godka doonliga uu geli karo

TALAABADA 1AAD

Ka Qaad Raashinka

Bahda doonliga waxay cunaan wax kasta. Si looga takhaluso doonliga, waa in aad ka takhalustid raashinka.



Ilaha raashinka dibadda ee caadiga ah waxaa ka mida ah: raashinka shimbirta (dhamaan noocyada), raashinka unreyska, raashinka xoolaha guriga jooga, qashinka raashinka weelasha lagu shubo qashinka dibadda, fruttada ka soo dhacda geedaha fruttada, fruttada "blackberries", qashinka, miraha cawska iyo xaarka xoolaha guriga jooga.

Maxay cunaan doonliga marka ay soo galaan gudaha?

Isla raashinka aan sameyno. Sida aan u keydino raashinka gurigena waxay muhiim u tahay ka-hortagga doonliga. Haddii doonliga waaweyn iyo doonliga yaryar soo galaan gurigaada, waxaad **raashinka badana la soo geliyo baakooyinka gelisaa sanduuqyada baakada ama bacyada blaastigga, gudaha weelasha!**

TALAABADA 2AAD

Dil Bahda Doonliga

Dabbinta loo dhigo iyo sumaynta waa labo siyaabo shaqeeya oo lagu dilo bahda doonliga. Waxaa dhici karto in dhibaatooyinka qaar ee lagala kulmo doonliga aad u adag yahii in aad keligaa kantaroolshid waxaana dhici karta in aad u baahatid in aad qoratid shaqaale kantaroola cayayaanka oo shatti haysta. Waxaad ka heli kartaa bogagga jaaladha liiska telefoonada, qeybta hoos timaada "Adeegyada Kantaroolka Cayayaanka Darran."

Dabidda

Dabidda waa habka loogu jecel yahay oo lagu dilo doonliga ku jiro gudaha. Dabbinta looxa ee isqabsata ma aha qaali waana shaqeysaa. Caadi ahaan, subagga looxa waxaa loo isticmaali karaa sida cantalaalka. Diyaari dabbinta kaddibna waxaad dhigtaa meel ay badan tahay dhaqaaqa doonliga, waa in la dhigo meel 3 inji u jirta darbiga. Kiciyaha dabbinta waa in loo jeediyo darbiga. Dabbinta waxaa la gelin karaa sanduuq ka furan labada dhinac si looga badbaadiyo caruurta iyo xoolaha guriga jooga.



Sumaynta

Bahada doonliga ee la sumeyay waxay ku dhiman karaan kabbiska iyo darbiyada, waxayna ku dhaafaan ur. Laguma talliyo in sunta loo isticmaalo gudaha guryaha ama dhismooyinka. Sunta doonliga waaweyn ee loo isticmaalo dibadda waxaa laga heli karaa dukaamanka qalabka iibiya iyo waxaa kaloo laga iibsaa karaa qaar ka mid ah adeegyada kantaroolka cayayaan dishada aqoonta leh iyo dukaamanka ku takhasusa badeecadaha kantaroolka cayayaan dishada.

Waa in mar kasta la isticmaalo sunta doonliga meelaha cantalaalka ee sugan si looga fogeeyo caruurta iyo xoolaha guriga jooga. U isticmaal oo keliya sida waafaqsan filmaamaha ku yaal calaamadda.



Goobta cantalaalka ama "Sanduuqa cantalaalka"

TALAABADA 3AAD

Waxaad Bahda Doonliga ka Ilaalisaa Deydka

Ha ka dhigin deydkaada meel ay ku hoydaan bahda doonliga. Ha siinin meel ay ku noolaadaan kuna koriyaan kuwooda yaryar.

Doonliga waxaa hooy u ah:

- Waxa tuuran dibadda ee ka kooban qashin iyo wax la tuuro
- Waxyaabaha tuuran looxa hoostiisa ama geedaha la soo jaray Isla saar loox ilaa 18 inji dhulka korkiisa
- Hoosta dhirta "blackberry" jiqda, dhirta saaqda iyo cawska dhaadheer ee aan la gaabinin ama la jarin.
- Gudaha baabuurta, qalabka, fadhiga iyo katiifadda dhinac la dhigay oo aan la isticmaalin
- Gudaha godadka hoosta dhismaha



TALAABADA 4AAD

Waxaad Bahda Doonliga ka Ilaalisaa Gurigaada

Meelaha furan guryaha, dhismooyinka ama daashyada waa in la niibo si looga hortaggo in aysan soo gelin bahda doonliga.



- Hubso meelaha furan ay tubooyinka ama fiilooyinka ka soo galaan dhismaha, meelaha saqaafka la kumo darbiyada, iyo wareegga aasaasyada, albaabada iyo dariishadaha.
- Isticmaal shimento, ¼ inji marada marrada lagu shaqeeyo, fiilo, ama maado xajjisa kuleylka si aad u xertid meelaha furan.
- Meelaha hoose ee lagu gurguurto iyo saqaafka kore waa in la niibo si looga hortaggo gelitaanka bahda doonliga.
- Bahda doonliga waxay badanaa ka soo galaan albaabada furan, dariishadaha ama albaabada xoolaha jooga guriga. Geli biraha gadaal lagu dadbo alabaabka si hoosta looga soo gelin.